



Photo: Astrid Sehl

Adiga la kulma ama yaqaan dad raba iney dibunoqdaan ama ka fekeraya iney dibuguuraan

Mid ka mid ah ujeedooyinka mashruuca- INCOR waxa weeye sare uqaadidda heerka aqooneed ee ku saabsan dibunoqoshada iyo dibuguurida ee shaqaalaha qaxootiga ee Norway. INCOR waxey u heysaa shaqaalaha xerooyinka qaxootiga adeeg talobixin oo ku saabsan dibunoqoshada, dibuguurida iyo macluumaad dalalka ku saabsan.

Adiga ka shaqeeya degmada (kommune), urur tabaruc ama si kale xidhiidh ula leh dad doonaya iney dibunoqdaan ama dibuguuraan, waxey warbixin iyo talo u soo doonan karaan INCOR. Waxey INCOR u soo bixi kartaa degmooyinka, xerooyinka qaxootiga, ururada iyo jaaliyadaha si ay u ogeysiiyaan xaaladda caalamka qaxootiga.

Yaan la xidhiidhi karaa?

INCOR waxa ka shaqeeya la taliyeyaal sirqarin leh, oo waxaad xaq u leedahey in aanad isa sheegin haddii aad sidaa rabto.

Dir telifoonkan bilaashka ah
800 41 855 ama 800 41 042

Waxaanu ku jawaabi karaa luqadahan:

Noorwiji, ingiriisi, farsi, deri, pashto, kurdi (sorani), carabi, ruush iyo bulgaari ama waxaanu u keenaa turjumaan luqadaha kale.

Waxa kale oo aad la hadli kartaa xafiiska telifoonka laga gudbiyo oo ah 23 10 98 00 kana codso in lagu gudbiyo qof ka shaqeeya INCOR.

U dir fagas lambarkan:

23 10 98 01

U dir email:

incor@nrc.no

U qor warqad:

INCOR- prosjektet, Flyktninghjelpen
Postboks 6758, St. Olavs plass
0130 Oslo

Haddii aad ballan la leedahey INCOR ee Caawinta qaxootiga, booqo xafiiskeeda oo ku yaal Grensen 17, Oslo




Photo: Ashild Eriksen

Somalsk

Design: cox.no Trykk: Gamløben Grafiske as

Warbixin iyo talo ku saabsan Dibunoqoshada iyo dibuguurida



War dheeraad ah oo ku saabsan INCOR waxaad ka heleysaa:

www.nrc.no/incor

Flyktninghjelpen waa urur madaxbannaan oo bini'aadamnimo kaas oo siiya caawimo iyo ilaalin dadka soo barakacey iyaga oo aan u eegeyn jinsi, diin, dhalasho iyo mabda'a siyaasadeed toona.

Flyktninghjelpen wuxuu khibrad dheer oo qeybaha kala duwan ee aduunka ah u leeyahay hawlaha dibunoqoshada iyo dibuguurida.

Mashruuca- INCOR ee Caawinta qaxootigu waa adeeg warbixin- iyo talobixin oo ku aadan

- Dadka heysta ogolaansho degenaansho
- Magangelyodoonayaasha
- Dadka la soo siiyey diidmo kama dambeys ah
- Dhalinyarada keligood ah ee qaxootiga ama Magangelyodoonayaasha ah
- Shaqaalaha qaxootiga iyo shaqaalaha xerooyinka qaxootiga

Mashruuca- INCOR wuxuu jirey ilaa 1995, wuxuu markaa leeyahay aqoon badan oo ku saabsan waxa muhiimka u ah dadka doonaya iney noqdaan ama ka fekeraya iney dib uga guuraan Norway oo ku noqdaan dalkoodii.



Photo: Astrid Sehi

Haddii aad rabto inaad dibunoqoto ama aad ka fekereso inaad dalkaagii dibuguguurto, waxaanu kaa caawin karaa inaanu kuu soo helo macluumaad ku saabsan sida xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, habmarka magangelyada, xaaladda dalkii, barmaamijka dibunoqoshada iyo dinuguurida, oo waxaanu ku siineynaa talo ku saabsan waxa muhiim ah inaad ka fekerato si aad si fiican ugu diyaar garowdo.

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan

- Xuquuqda aad leedahey markaad dibunoqoneyso
- Qofka aad Norway iyo dalkii la xidhiidhi karto markaad dinunoqoneyso
- Habab ama caawimooyin nooc ee ah ayaad ka heli kartaa dawlada Norway markaad noqoneyso.
- Maxaa muhiim ah inaad ka fekerato kahor inta aanaad go'aansan inaad dalkii dibugunoqoto ama dibuguguurto.
- Sidee ayaad dibuguurida dalkii ugu diyaargareyn kartaa carruurta.
- Khibrado nooc ee ah eyey u leeyihiin dadka kale dibunoqoshada iyo dibuguurida .

La xidhiidh INCOR!

INCOR waxey booqatey qaxooti badan oo dibugunoqdey ama dibuguguurey dalkoodii, waxaaney soo ururisey khibradahoodii. Waa khibradahan kuwo aanu rabno inaanu kula wadaagno.



Photo: Roald Høvring



Photo: Hans Kristian Knævelsrud